# Guudmarka Gaarka ah ee La Shaqaynta Bulshada

Isbedelo u dhaxeeya qaabka socdaal oo uu keeney safmarkii COVID-19 iyo jadwalka kasoo shaqaynta guriga ay keeneen darteed, Sound Transit waxa uu dib u eegid ku sameeyay mudnaananaha Qorshe Khidadeedka Sounder South 2020. Kahor safmarkii, saadaasha culayska rakaabka koraya wakhtiyada saxmada ah waxay keentay mudnaan tareeno dhaadheer (10-isjiid halkii ay ka ahaan jireen 7-isjiid ee la isticmaali jiray 2019) si loogu buuxiyo baahidan korodhka ah.

Dayrka 2023, waxa aanu samaynay dadaal la shaqayn oo aanu doonayno in aanu ku fahano mudnaanaha dadka ee haynta qorshaha wakhtigan ee tareenada dhaadheer wakhtiga socodka saxmada marka loo barbar dhigo in lagu daro safaro dheeraad ah jadwalka wakhtigan. Wax aanu sido kale eegey sida dadka ay wakhtigan u Sounder iyo sida ay jeclaan lahaayeen in loogu hormariyo mustaqbalka. La sheekeysigaayaga waxa aanu ku ogaanay in wixii safaro cusub ay u baahan doonan la wada hadal BNSF Railway, kuwaas oo leh wadada uu ku soco Sounder.

*La shaqaynta ku salaysan tirada*




**Waxyaabaha muhimka ah ee kasoo baxay fikirka dadka:**

- Boqolkiiba sagaashan dadka xog uruurinta kasoo jawaabay waxay doorbidaan safaro cusub oo lagu daro marka loo eego tareenada dhaadheer. Heerkan doorbiditaanku waxaa ka sinaa dhaaan dadka qaybahooda kala duwan, laakiin waxaa waxoogaa ku hooseeyay dadka sida joogtada ah u raaca[1], 79% waxay doorbidaan safaro cusub.
- Ku daritaanka adeegga maalmaha fasaxa ah waxaa doorbiday 81.6% dadka xog uruurinta ka jawabay, halka ku daritaanka adeegga cusub ay ka taageeren 57%.
- Aqlabiyada xoogan ee dadka ka jawaabay (75.3%) waxay taageereen yaraynta in la yareeyo inta jeer mudada saxmada si loogu daro safaro wakhtiyada kale oo maalinkii ama todobaadkii (oo ku xidhan in lagala hadlo BNSF oo ay ogolaato).

Si lo uruuriyo fikirkan, waxa aanu qabanay guri furan oo onleyn ah intii u dahxaysay Sebteeber 27 iyoOktoobar 29, oo waxa kasoo jawaabtay wax ka badan 5,600 oo waxaa loo turjubay sideed luuqadood (Isbaanish, Fitnaamiis, Kuuriyaan, Tagalog, Jayniiska Fudud, Soomali, Yukrayn iyo Ruush). Waxa aanu sidoo kale qabanay afar koox diirad la saaray oo bulshooyinka laga sadbursaday ah oo waxa aanu kula hadalnay wax ka badan 4,000 oo ruux munaasabada bulsho iyo istaanaha Sounder.

Kulanka furan ee onleynka ah ayaa la gaarsiiyay bulshooyinka aagaga Sounder South, si ay u gaadho dadka rakaabka iyo kuwa kaleba. Waxyaabaha la baahiyay waxaa kamid ah waraaqo xayaysiis ah, xayaysiis dhijitaal ah, iyo xayaysiis saxaafada deegaanka ah oo lagu baahiyay istaanaha Sounder ee magaalooyinka iyo xaafada bulshada ee degmooyinka South King iyo Pierce. Lix saxaafadeed o deegaanka ah ayaa sheeko ka baahiyay

[1] Rakaabka joogtada ah waxaa loola jeedaa dadka sheegey inay raacaan Sounder ugu yaraan hal mar todobaadkii.

xog uruurinta, oo waxaa kamid ah raadyaha Isbaanishka ah oo waraystay shaqaalha Sound Transit. Cid badan oo bulshada oo lala shaqeeyo iyo deegaanada ayaa sidoo kale gacan ka gaystay baahinta weedha iyada oo ku sii wadaagay barahooda bulshada maclumaadka oo iimeelana ugu diray dadka u dhaw.

### *La shaqaynta haboon*


Waxa aanu isticmaalnay dhawr qaab oo lagu gaadhisnayo si aanu u xaqiijino in codadka bulshoyinka hore loga *sadbursaday la maqlo oo ay ka* muuqato natiijada. Waxa aanu u turjunay xog uruurinteena iyo badi macluumaadka sideed luuqadod oo waxa aanu qabanay afar koox diirad la saaro oo foolka-fool ah oo aanu u qabanay bulshada laga sadbursaday, sadex waxa uu ahaa laba luuqadood (Isbaanish iyo fiyeednaamiis). Waxyaabaha ugu waawayn ee kasoo baxay dadaalkan waxaa in mudnaananaha guud ahaan ay ka koobnaayeen dhamaan kooxaha, oo waxaa aad diirada ay u saareen kooxdu adeegga maalmaha fasaxa, ka qayb galayaasha iyo dhamaan qaybaha dabaqaha, qoomiyada iyo deegaanada kala duwan.

**Cida aanu gaadhnay:**

- *1,157 oo ruux ayaa ka jawaabay (26.4%) oo isku shega inay yihiin dadka midabka ah*
- *472 booqde gaar ah ayaa loo turjubay nuqulada kulanka furan ee onleynka ah*
- *108 ayaa buxiyay xog uruurinta turjuban*
- *462 ruux oo ka jawaabay ayaa sheegey in luuqad kale oo Ingiirisi ahayn ay si joogto ah ugu hadlaan gurigooda*
- *24.8% dadka ka jawaabay waxay sheegeen in dakhligooda saadkii uu ka yar yahay $75,000*

# *Waxa aanu maqalnay: natiijooyinka xog uruurinta*

### *tareenada Dhaadheer iyo safarada cusub*




**Dhamaan kooxaha dadka kala duwan waxay muujiyeen rabitaano isku mid ah oo ah mudnaan safaro cusub marka loo eego tareenada dhaadheer, oo waxaa kamid ah dhamaan dadka dabaqadaha iyo qoomiyadaha, oo 89.6% waxay taageereen safaro cusub.**

Rakaabka joogtada ah ee Sounder (kuwa raaca ugu yaraan hal mar todobaadkii) waxayna sidaa u doorbidaynin safarada cusub (79%) marka loo eego dadka guud ee ka jawaabay.

Dadka ka jawaabay xog uruurinta ee meel kasta kasoo jeeda waxay aad u doorbidayeen safarada cusub marka loo barbar dhigo tareenada dhaadheer. Waxaa aad usii doorbidayay dadka ku nool Seattle (96.4%) oo waxaa ugu hooseeyay dadka ku nool Degmada South King (84%).

Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Qorshaha Khidada Sounder South

**Tusaalaha faalooyinka laga heley dadka ka jawaabay xog uruurinta**


*"Waxa aan doonayaa Sounder oo noqda nidaam tareen deegaanka ah oo rasmiga ah oo aanu kaliya diirada saarin saacadaha saxmada."*

*"Badi safarada waxban ayay ii tarayaan aniga iyo qoyskayga."*

*"Maku noqon kartaa tareenka 7 buudhi ah ugu yaraan? Waxa aan raacayay Sounder ilaa 2005 iyo baaskiil ilaa 2008. Korodhka baaskiilka laydhka ku shaqeeya iyo iskuutarta ayaa ka muhiimsan gadiid badan."*

### *Safarka maalinkii yo wakhtiyada la doorbido*

**Badanaa dadka ka jawaabay (81.6%) waxay sheegeen inay raaci doonaan safaro cusub oo maalmaha fasaxa ah, iyada oo badi aqbalabiyadu (57%) ay sheegeen inay raaci doonaan maalmaha shaqada. Dadka ka jawaabay waxaa iskaga mid ka ahaayeen dabaqada iyo qaybaha qoomiyadaha.**




### *Safarada maalmaha shaqo*

Dadka doortay safarada maalmaha shaqo waxay doorteen ilaa laba ikhtiyaar oo wakhtiga maalinkii ah iyo jihada ay doonayaan in lagu daro safarada cusub. Qaybaha ugu caansan waxay ahaayeen adeegtada habeenkii [2]southbound (65.2%) iyo kuwa duhurkii [3]ee northbound (52.2%). Dadka aan rakaabka ahayn iyo rakaabka badanaa raacin [4]waxay aad u danaynayeen safarada northbound ee habeenkii marka la barbar dhigo dadka sida joogtada ah u raaca.

Degmada Pierce iyo Degmada South King dadka ka qayb galay ee ku sugnaa waxay doorbidayeen inay helaan ikhtiyaaro badan oo hawlaha galinka danbe ay kaga qayb galaan Seattle duhurkii northbound / habeenkii southbound safaro ah), halka dadka reer Seattle ay doorbadayeen inay helaan ikhtiyaaro badan safaro koonfur ahmaalinkii oo kusoo noqda northbound habeenkii.

Dadka ka jawaabay waxay sidoo kael dooran karaan maalinta todobaadkii ee ay raacayaan. Safarada todobaadka badhtankiisa ayay dadk badan doorbideen inay racaan, 78.7% dadka ka jawaabay waxay muujiyeen inay raaci doonaan Khamiista iyo 78.5% waxay muujiyeen inay raaci doonaan Arbacada. Waxaa taas ku xigay 73.9% oo muujiyay inay raaci doonaan Talaada iyo 73.4% inay raaci doonaa Jimcaha. Isniinta ayaa ugu rakaab yar oo waxay ahayd 63.8%.

Dhamaan dadka kala duwan waxay muujiyeen rabitaan isku mid ah oo maalmaha ah marka laga tago dadka saboolka ah[5] iyo dadka reer Seattle[6] oo muujiya inay aad u doorbidaan safarada Jimcaha oo ah 78.7% iyo 81.1% siday u kala horeeyeen.

---

[2] adeegga habeenka maalinka la shaqeeya waxaa lagu sheegeen 6 galabnimo - 10 habeenimo.
[3] adeegga badhtanka maalinka la shaqeeyo waxaa lagu sheegaa 8 subaxnimo - 2 habeenimo.
[4]Dadka aan sida joogtada ah u raacin ee ka jawaabay waxaa loola jeedaa dadka sheegey inay raacaan Sounder wax ka yar halmar bishii ama 2-3 jeerbishii.
[5] Dadka saboolka ah waxaa loola jeedaa dadka dakhliga qoyskoodu yahay $35,000 ama wax ka yar sanadkii.
[6] Dadka reer Seattle ee ka qayb galay waa dadka sheegey istaanka King Street inuu yahay istaanka ugu badan ee ay isticmaalaan (ka raacaan) ama ay ku dhaw yihiin (dadka aan rakaabka ahayn).

## Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Qorshaha Khidada Sounder South

### *Safarada maalmaha fasaxa*

Dadka doortay safarada maalmaha fasaxa waxay doorteen ilaa laba ikhtiyaar oo wakhtiga maalinkii ah iyo jihada ay doonayaan in lagu daro safarada cusub. Dadka badan waxya ku jawaabeen inay habeenkii qabtaan [7]southbound (57.7%) oo aroortiina qabtaan[8] northbound (46.6%). Tani waxay u badan tahay inay ka timid maadaama oo dadka ka jawaabay ay kasoo kala jeedaan Degmada South King iyo Pierce. Dadka degan Seattle waxay aad u doorbidaan habeenkii northbound (60.6%) iyo aroortiida southbound (50.8%)

> **Tulayaasha faalooyinka dadka ka qayb galay xog uruurinta**
>
> *"Aroontii ugu danbaysay wakhtiga tareenki ka baxayo Tacoma markasta way adkayd maadaama oo hal gaadhi qoyskiiba haysan leh ilmaha ee u baahan inuu eegyo xanaanada caruurta. Ikhtiyaarka wakhtiga danbe ayaa aad uga fudud.*
>
> *Waxa aan necebahay in saxmada aan ku xanibmo 8-subaxnimo ilaa 2:30 duhurnimo, waxa aan marar badan u raacay Uber guriga mudadaas sababo xaalado degdega ah dartood. Waxaan aan doorbidaa in aan gaadhiga u kaxaysto oo aan dhigto xafiiskayga."*
>
> *"Waxa aan jeclaan lahaa in aan arko safarada habeenkii in la kordhiyo. Waxay ii sahlaysaa in aan u joogo magaalada bandhig faneed/saacado madadaalo oo aan kula qaado dadka aanu wada shaqayno iyo asxaabta oo weli kuma aan tiirsanayn uber ama bas laakiin Sounder."*

Dadka ka jawaabay ee dakhligoodu hooseeyo waxay waxoogaa daneeyaan safarada aroortii southbound iyo habeenkii northbound, marka la barbar dhigo heerarka dakhliga ee kale. Dadka midabka ah[9] waxay waxoogaa yara danaynayeen gelinta danbe southbound iyo habeenkii northbound safarada ah, marka loo barbar dhigo dadka cadaanka ah.

> **Tulayaasha faalooyinka dadka ka qayb galay xog uruurinta:**
>
> *"Waxa aan kasoo jeedaa Tacoma laakiin waxa aan ku noolahay Seattle. Dhamaan qoyskaygu waxay weli ku nool yihiin Tacoma, oo waxa aan jeclaan lahaa in inta aan raaco Sounder aan soo booqdo maalmaha fasaxa..."*
>
> *"Waxa aan doonayaa in qaban karo Seattle ama Tacoma maalmaha fasaxa si aad ugu tago asxaabtay, ama aan u booqdo magaalada... Waxaa muhiimiyad gaarka ah in ruux ku nool meel aan u dhawayn meesha Tareen loo balaadhinayo."*
>
> *"Ku wadashada iyo dhigashada Suuqa Hoose ee Seattle way adag tahay oo waa qaali... Tareenka leh kaaga tagsiga biyaha iyo doonyaha ayaa ku wanaagsan banaanka maalmaha fasaxa."*

### *Ujeedada safarka*

Ujeedooyinka ugu caansan ee safarka waxaa noqonaysaa madadaalo ama hawlo isku imaatin dadka ah, sida ka qayb gal munaasabad, dalxiis, tukaamaysi/hawlo soo qabsasho, ama la kulan asxaabka ah iyo qoyska. Shaqada waxaa lagu sheege safaro 68% maalmaha shaqada iyo 37.6% maalmaha fasaxa ah. Ujeedada safarada kale waxaa kamid ah qabashada dugsiga iyo balamaha caafimaadka.

### *Awooda*

---

[7] adeegga habeenka maalinka fasaxa waxaa lagu sheegeen 5 galabnimo - 10 habeenimo.

[8] adeegga aroorta maalinka fasaxa waxaa lagu sheegeen 6 galabnimo - 10 habeenimo.

[9] Dadka midabka ah waxaa lagu sheegey: Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska; Aasiyaan ama Aasiyaanka Maraykanka; Madaw, Afrikaan ama Maraykanka Madaw; Dhalad Hawaii ama Jasiiradaha Kale ee Baasifiga; Bariga Dhexe ama Waqooyiga Afrika; Lama ama wax ka badan oo qoomiyadood.

## Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Qorshaha Khidada Sounder South

Ilaa 10% dadka ka qayb galay waxay sheegeen inay doonayaan mudnaanta tareen 10-buudhi ah marka loo barbar dhigo safarada cusub, oo waxa aanu ka helnay 80 faalo oo la xidhiidho xadiga makaanka ama awooda ee tareenada Sounder ee maanta. Todoba iyo toban kamid ah faalooyinkaasi waxay sheegeen in loo baahan yahay in lagu celiyo tareenka todoba buudhi saxmada darteed. Waxaanu sidoo kale maqalnay in baaskiiladaha iyo iskuutaradu ay gacan ka gaystaan mushkiladaha awooda.

**Tulayaasha faalooyinka dadka ka qayb galay xog uruurinta:**

*"Laga bilaabo seattle ilaa tukwila, waxaa jira qolal diyaar ah oo kaliya oo qabanaya southbound. waa mushkilad. badanaa waa in la istaago ugu yaraan istaanka auburn"*

*"Waxaa badan rakaabka Talaatada ilaa Khamiista maadaama oo dadka qaar ay kaliya shaqeeyaan 3 maalmood todobaadkii. Oo buudhiyada tareenku way buuxsamaan maalmahaas."*

*"Waxaa jiro tiro kordhaysa oo rakaabka wata baaskiiladaha iyo iskuutarada. Badanaa saacadaha saxmada ah goobahan buudhiyadu way buuxaan gaar ahaan xagaaga/maalmaha cimiladu wanaagsan tahay."*

### *Habaynta jadwalka maalnta*

Xog uruurinta waxaa la waydiiyay hadii ay taageeraan yaraynta in la yareeyo inta jeer mudada saxmada si loogu daro safaro wakhtiyada kale oo maalinkii ama todobaadkii (oo ku xidhan in lagala hadlo BNSF oo ay ogolaato). Badanaa dadka ka qayb galay (75.3%) waxay taageereen balaadhinta safarada, oo heerkan taageeada waxaa iskaga mid ahaa dadka heerarka kala duwan ee dakhliga leh, qoomiyada, iyo deegaanka. Dadka badanaa raaca, 55.7% waxay doorbidaan in la yareeyo inta jeer saacadaha saxmada oo lagu daro safaro wakhtiyada kale.

## *Waxa aanu maqalnay: kooxda diirada la saaray iyo wacyi gelinta dadka danta ka leh*



*Koox wada hadal oo Tacoma oo kala yeeshay xubnaha kooxda qoobka ciyaarka Vietnamese Sunflower*

Shaqaalaha waxay la sheekeysteen bulshooyin kala duwan oo hore looga sadbursaday oo loo qaybiyay afar kooxoo doo diirada la saaray si loo fahmo baahiyahooda, qaabka safarka, caqabadaha raacitaanka tareenka, iyo sida S Line ay si dhaanta ugu shaqayn karto dadka. Dhamaan kooxda, waxaa xoogay rabitaanka in lagu daro adeegga maalmaha fasaxa, oo qaar badan waxay muujiyeen inay isticmaalaan Sounder ugu yaraan hal mar bishii oo ay u raacaan wixii faakidaysi ah sida dalxiiska iyo tukaamaysiga ah. Waxaa sidaa kale jirta rabitaan xoogan marka laga tago adeegyada maalmaha shaqada wakhtiyo kala duwan, oo waxaa kamid ah aroorta hore, barqada, duhurkii iyo fiidkii labada jihaba si qaab dhaama loogu taageero isku socodka iyo shaqada xabaalaha.

## Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Qorshaha Khidada Sounder South

Shaqaalaha sidoo kale waxay sameeyeen waraysiyo ay la sheegeen hay'adaha jiidan. Waxaa jiray barnaamijyo kala duwan oo wada sheekeysiyadan ka yimid, oo waxaa kamid ah: rabitaank adeegga duhurkii todobaadka dhaxdiisa; rabitaan safaro badan "rakaabka loo daayo" oo shaqaalaha Degmada Pierce dhaxdooda ah;  rabitaan xoogan oo adeegga maalmaha fasaxa ah, gaar ahaan xagaaga, ka imanaya meelaha dalxiiska ee Degmnada Pierce iyo South King; iyo rabitaan badan oo adeegga duhurkii (labada jiho) oo loogu talo geley ardayda UW-Tacoma.




*Tacoma LatinX Festival*



*Auburn Halloween Harvest Festival*



*Ciyaaraha kubada Sumner vs Graham-Kapowsin*

## *Talaabooyinka xiga*

Sound Transit waxa uu adeegsan doonaa fikirkiina bulshada, oo waxaa barbar socda daraasad lagu samaynayo qaababka, daraasada hay'ada ee Loodka, iyo qiyaasta rakaabka si loogaga hadlo wada hadalka Gudida Dayrta 2024 wixii ku saabsan mudnaanta safarada cusub in laga doorbiyo tareenada dhaadheer ee ku qora Qorshaha Khidada Sounder South. Wixii safaro cusub ee Sounder waxay u baahan tahay inay ansixiyeen BNSF, oo iska leh wadada uu maro Sounder.